







Kalaay waxay la hadashaa dhirta


-  Ursula Nafula
-  Jesse Pietersen
-  Abdi Muse
-  somali
-  nivå 2

(uten bilder)







Tani waa Kalaay. Waxay jirtaa toddoba sano.
Magaceeda macnihiisa waa “midda
wanaagsan” luqaddeeda, Lubukusu.




Kalaay way soo toostaa waxeyna
lahadashaa geedka liinta ah. “Fadlan
geedka liinta ahoow, weynoow oo na sii liin
badan oo bissil.”




Kalaay waxay aadaa dugsiga. Jidka waxay kula hadashaa cawska. “Fadlan caws, weynoow cagaaro oo ha qallalin.”




Kalaay waxay soo martaa ubaxyo duureed.
“Fadlan ubaxyo, sii magoola, si aan
timaheyga idiin saarto.”




Iskuulka, Kalaay waxay la hadashaa geedka dhexda xerada ku yaallo. “Fadlan geed, so saar laamo waaweyn si aan ugu akhrisano hooskaada.”



Kalaay waxay la hadashaa bowdka ku wareegsan dugsigeeda. “Fadlan u kora si awoodleh oo joojiya soogallida dadka xun.”



Markay Kalaay guriga ku laabato, waxay booqataa geedka liinta.” Miyay bislaadeen midhahaada wali? Ayey weydisaa khalaay.



“Liinta weli waa cagaar,” ayay ku neef tuurtay Kalaay “Waxaan ku arki doonaa berrito geedka liintaw,” ayay tidhi Khalaay. “Malaha markaas baad ii yeelan doonto midho liin ah oo bislaaday!”



Barnebøker for Norge

barneboker.no

Kalaay waxay la hadashaa dhirta

Skrevet av: Ursula Nafula

Illustret av: Jesse Pietersen

Oversatt av: Abdi Muse

Denne fortellingen kommer fra African Storybook (africanstorybook.org) og er videreformidlet av Barnebøker for Norge (barneboker.no), som tilbyr barnebøker på mange språk som snakkes i Norge.

Dette verket er lisensiert under en Creative Commons
[Navngivelse 4.0 Internasjonal Lisens](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/).